

Talooyinka Wadista Ammaanka ah ee Xilliga Jiilaalka Ka hortag shilalka, dhaawaca, iyo ciladaha



U kaxee Gaariga goob makaanig si loo hubiyo xaaladdiisa:

Hubi shaaga taayirada, taayirada barafka ayaa kordhin kara awooda joogsiga kana hortagi kara in gaariyaashu isku dhacaan.

Hubi matoorka iyo dhammaan dareerayaasha.

Ilaali heerarka dareerayaasha gaariga dhaqa, ritoorka iyo gaaska ku jira taangiga.

Diyaar garoow - waxay qaadansaa waqti dheeraad ah/xilli hore bilow:

Fiiri wararka maxaliga ah (wktv.com) si aad u hesho xogta cimilada/digniinaha xirista wadooyinka iyo warbixinada xaalada wadooyinka waawayn <https://511ny.org/>

Ka hor intaadan gaariga wadin - ka saar barafka tuubada qiiqa, daar gaariga si uu u kululaado, sifee daaqaadaha, kana xaaq barafka dusha gaariga iyo layrarka

Xasusnoow xakabadaha iyo buundooyinku waxay baraf noqdaan ka hor sagxadaha wadooyinka

Kordhi badka u dhaxeeya gaarigaaga iyo gaariga kaa horeeya

Yaree xawaaraha gaariga, barafka iyo biyaha barafku wa akuwo sibi ah. Joojinta gaarigu waxay qaadansaa waqti dheeri ah

Baro sida looga soo weecdo meelaha sinbiririqada leh, wadooyinku waa kuwo lagu sibqanaayo xilliga jiilaalka

Baro inaad haysato iyo inkale bareegyada Antilock Braking System (ABS, Nidaamka Bareegga Aan Isxirin); MARNA ha riixin bareegyada ABS

Soo qaado alaabta loogu talagalay xaaladaha degdegga ah:

Toosh, koofiyad, galoofis, buste, dab dhaliyaal (qarxiso/taraq aad kusoo ridato bac aan biyuhu gali karin)

Biyaha la cabo; laws, miro qalalan, nachac adag

Badeel, xaaqinka barafka, iyo fiilooyinka dabka baytariga

Ciid, cusbo/dhalaaliyaha barafka ama qolada biisada haddii gaariga uu socon waayo ood so gashato buudka danbe ee gaariga

TS. Somali. Winter Safe Driving Tips. 2020



Governor's Traffic
Safety Committee